

## **Waxaan ka caawini doonaa sidii aad shaqo cusub ku heli lahayd**

Haddii shaqada laga joojiyo, taasoo u sabab ah hawl la`aan, jirro ama aad dhamaysatay shaqo kummeelgaar ahayd, waxaad caawinaad aad shaqo cusub ka hesho, ku bilaawdo ganacsasho ama wax barasho ka heli kartaa Kaydka amniga TSL. Taageerada waxay kaloo qayb ka tahay heshiis wadareedka ka hirgalay goobta shaqada mana bixinaysid wax kharash ah.

### **Taageerada waxay ka kooban tahay**

Waxaad naga heli doontaa hagaha shaqada oo adiga ku gaar ah, kaasoo hadba xaaladda aad ku sugan tahay ku caawini doono. Hagaha shaqada wuxuu tusaale ka caawini doonaa xiriir yeelashada, codsashadaha iyo CV:ga, iyo in ka caawinno u diyaargarobida waraysiyada. Waxaa kaloo laga caawini karaa sidii aad xiriir u la yeelan lahayd hay`adaha, sida Khasnadda caymiska bulshada iyo Xafiiska Shaqada.

Haddii aad baahi gaar leedahay, taasoo u sabab ah jirro, waxaad heli kartaa taageero xoojisan oo xaalad-caafimaadeedkaaga loola qabsiiyay, iyadoo hadafka u yahay sidii aad shaqo cusub ku heli lahayd hadba kartida shaqada.

Waxaad heli kartaa fursad tababar haddii tallaabo ka qaadista, ay kordhin doonto fursadaha aad suuqa shaqada si dhaqsi badan shaqo cusub kaga heli lahayd. Waxaa kaloo laga caawini kartaa ansixinta, taasoo macneheedu ay tahay bandhigida iyo xaqiijinta karti-xirfadeedkaaga.

Haddii aad 40 sano buuxsatay waxaad kaloo xaq ugu lahaan kartaa, taageero-dhaqaaleed kale oo loo yaqaanno (AGB).

Haddii aad go`aansato inaad bilaawdo waxbarasho muddo dheer qaadan doonto, sida tusaale barato xirfad cusub, waxaad xaaladdaas Kaydka amniga TSL ka heli kartaa mihnadda- iyo hagida waddada waxbarashada. Waxaa kaloo la heli karaa fursadaha taageero-dhaqaaleed kala duwan, kuwaasoo ku suurtageelin doonaan in aynan ka lummin daqliyadii berri hore aad lahayd adigoo islamarkaana aad aqoon kororsanayso.

### **Sidatan ayaa loogu dhaqaaqa:**

Haddii hawllo la`aan dartood shaqada laga fariisiyo, wuxuu loo shaqeeyaha iyo wakiilka ururka shaqaalaha codsanayaan taageerada. Haddii jirro ama shaqo kummeelgaar ahayd ka dhammaato adiga laf ahaantaada ayaa codsan karo. Barta internetka TSL.se ayaa codsiga laga soo gudbiyaa.

1. Kaddib hawl wadeneyada Kaydka amniga TSL ayaa kula soo xiriir doonaan, kaddib waxaad ka wada hadli doontaan xaaladdaada iyo nooca taageerada lagu siin karo.
2. Haddii aad oggolaato si wadista taageerada, waxaa lagu yeeli doonaa hagaha shaqada oo adiga ku gaar ah kaasoo ku caawini doono.
3. Hagaha shaqada wuxuu ka caawini doonaa sidii aad shaqo cusub ku heli lahayd, ku wax baran lahayd ama ku bilaabi lahayd ganacsasho.
4. Haddii loo baahdo waxaad kaloo heli kartaa fursadda tababar.
5. Haddii aad 40 sano buuxsatay waxaa laga caawini karaa sidii aad Afa Försäkring kaga codsan lahayd taageero-dhaqaaleedka loo yaqaanno (AGB).

### **Shuruudaha gundhig u ah qaadashada taageero-dhaqaaleedka:**

- Haddii shirkad aad u shaqayso oo u ku khuseeyo heshiis-wadareedka ay wada galeen Ururrada Ganacsateyaasha dalka Iswiidan iyo Ururrada Shaqaalaha dalka Iswiidan LO.
- Haddii 24 bilood ee ugu dambeeyeen aad ugu yaraan 12 bilood soo shaqaysatay.
- Haddii weli aadan 65 sano buuxsan.

Ku saabsan qaybo taageerada waxaa hirgalo shuruudo dheeraad.

### **Warbixin dheeraad iyo caawinaad shaqsiyeed**

Warbixin dheeraad ku saabsan taageerada waxaad ka aqrisan kartaa barta internetka TSL.se. Xagga sare ee bogga waxaad ka beddeli kartaa luqadda.

Soo-dhowoow, caawinaad shaqsiyeed darteed noola soo xiriir:

- Khadka taleefanka: 010-480 91 20
- E-mail: [info@tsl.se](mailto:info@tsl.se)